

Ku daaweynta daawada Tamiflu bukaanka ee laga yaabo inay qabaan hargabka A(H1N1)

Haddii aad qabtid hargab (influenza), qaadashada Tamiflu-gu waxay soo gaabinaysaa muddada jirrada, waxayna yareynaysaa khatarta loogu jiro in uu kugu xumaado haddii aad daaweynta isugu billowdid sida ugu dhaqsaha badan ee suurtagalka ah ka dib marka jirradu kugu dhacdo.

Wasaaradda caafimaadka iyo daryeelku waxay soo rogtay nidaam ku meelgaar ah oo u oggolaanaya in farmashiisyataashu (farmasøytene) dadka u qoraan daawooyinka Tamiflu iyo Relenze. Si daawada lagu siiyo, waa inaad foom adigu iska buuxisaa.

Tamiflu la siinayo dadka sida gaarka ah halista ugu jira

Haddii aad ka mid tahay dadka sida gaarka ah halista ugu jira, ayna ku hayaan xummad/qandho iyo calaamadaha kale sida qufac engegan, muruqyo xanuun, cune xanuun amase sanku ku xiran yahay (snue), waxay hay'adaha dawliga ah ee caafimaadku kugula talinayaan in aad billowdid isku daaweynta Tamiflu sida ugu dhaqsaha badan ee suurtagalka ah (ugu dambeyn 48 saac guduhood) ka dib markaad jirratid ee aad isku aragto calaamad ama calaamado badan oo ah kuwa kor lagu sheegay. Arrintaani waxay muhiim sii tahay haddii aad og tahay in dad badan oo agagaarkaaga deggani ay qabaan hargabkaan.

Dadka aan aheyn kuwa sida gaar ah halista ugu jira

Haddii ay ku hayaan xummad/qandho iyo calaamadaha kale sida qufac engegan, muruqyo xanuun, cune xanuun amase sanku ku xiran yahay (snue), adna waa lagugu daaweyn karaa Tamiflu haddii aad adigu dooneysid. Haddii dad badan oo agagaarkaaga deggani ay qabaan hargabkaan, waxay u badan tahay in aad adiguna cudurkaa qabtid haddii aad isku aragto calaamadaha kor lagu soo sheegay. Si ay isku daaweynta Tamiflu-gu ay tayo u yeelato, waxaa muhiim ah in isku daaweyntu sida ugu dhaqsaha badan ee suurtagalka ah u billaabato (ugu dambeyn 48 saac gudahood) ka dib marka la jirrado.

U isticmaalidda Tamiflu-ga ka hortagid ahaan

Hay'adaha dawliga ah ee caafimaadku waxay ku talinayaan in Tamiflu-ga loo siiyo ka hortagid ahaan dadka cudurkan halista gaarka ah ugu jira, haddii qaar ka mid ah dadka ay isku dhow yihiin uu ku dhaco hargabkaani. Dumarka uurka leh waxaa lagula talinayaa in ka hortagid ahaan loo siiyo Relenza haddii ay qaar ka mid ah dadka ay isku dhow yihiin uu ku dhaco hargabkaani. Dumarka uurka lihi waxay ka qaadan karayaan Relenza farmashiyayaasha si la mid ah sida Tamiflu-ga looga qaadan karayo.

Goorma ayaad dhaqtar la xiriiraysaa

Haddaad aad u jirrato, waxaad mar walba la xiriireysaa dhaqtarkaaga joogtada ah (fastlegen) amaba dhaqtarka heeganka leh (legevakten).

Siinta Tamiflu

Si lagu siiyo Tamiflu adiga oo aan dhaqtarku kuu soo qorin, waa inaad foom adigu iska buuxisaa, adiga oo ku qoraya macluumaadka sida cudurku kuu hayo iyo warbixin shakhsiyeed (oo uu ka mid yahay lambarka dhalashadu). Arrintaani waa muhiim waayo waxaa la iska rabaa in la diiwaangeliyo isticmaalka Tamiflu-ga. Waxa aad kala soo bixi kartaa foomkaan barta interneetka ee www.pandemi.no. (laga billaabo khamiista 5ta nofeembar), amaba waxaaba laga helayaa farmashiyaha

Haddii aadan farmishiyaha imaan karin 24 saac gudahood ka dib marka aad jirrato, waxaa habboon inaad la xiriirtid dhaqtarka heeganka leh oo lagaa siin karo Tamiflu. Farmashiyaasha qaar ayaa axadaha furan.

Lagama maarmaan ma aha in qofka jirran laftiisu farmashiyaha keeno foomka uu iska buuxiyey. Dad kale waad u qaadi kartaa Tamiflu, tusaale ahaan haddii qoyskaaga qaar ka mid ahi jirran yihiin. Qof kasta oo aad Tamiflu u qaadeysid, waa inaad u waddaa foom uu qofku iska buuxiyey.

Qiimaha iyo qiimo goynta

Waxaa kale oo daawooyinkaan lagu soo rogayaa nidaam ku meel gaar ah oo qiima dhimis ah, iyada oo Tamiflu-ga laga dhigay 50,- karoon, Relenza-na 51,- karoon. Bukaanka aan daawada dhaqtarku u soo qorin waxay kale oo ay bixinayaan 20,- karoon oo farmashiyuhu ugu qorayo daawada. Bukaanka farmashiyaha daawo

ka soo gaata iyagoo nidaamkan maraya waxay sidaas awgeed baakadkii daawo ahba ka bixinayaan qiyaastii 70,- karoon. Qeybta la dhimay ee qofku ka bixinayo daawadaan waa nidaam la xiriira cudurkaan faafa, sidaas awgeedna laguma isticmaali karo kaarka lacagta la'aanta daawada loogu qaato (frikort).